

Xawaalad Lacageed



Xawaalad Lacageed waa xaalad caan ah oo qurba-joogtu u dirayso qoyskooda lacag toos ah. Tani waxay sidoo kale khuseysaa bulshada Soomaalida oo dhan meel kasta oo ay adduunka ka joogaan. Caadi ahaan arintan waa qaab dadban oo lacag loogu dirayo qooyis ku sugan meel kale . Diiwaanka Wikipedia wuxuu ku fasirayaa Xawaalad Bangiyeedka sida soo socda:

"Xawaalad waxay ku shaqeysaa nidaam kalsooni iyo is aamin ah. Lacagta waxaa lagu bixiyaa miiska xafiiska xawaaladda ayadoo kaash ah. Waxaana lagu diraa xiriirka tooska ah ee (Telefoonka , Fax ama E-mail) Wuxuuna qaadan karaa ruuxa loo diray lacagta daqiiqado ka dib meel kasta oo uu adduunka ka joogo, loomana baahna in uu leeyaha xisaabaha loo yaqaan account lambar ama uu xubin ka yahay shirkadaha xawaalada, waxaa kali ah oo looga baahanyahay in uu is muujiyo oo la yimaado aqoonsi ansax ah. Muddo gaaban ka dib waxaa loodiraha lacagta lagu wargalinayaa akhbaar loo sheegayo in ay lacag u taalo xafiiska xawaaladda shirkadda, daqiiqado ka dibna waxaa diraha lacagta u soo dhaca E-mail ku wargalinayo in lacagtii uu diray, uu qaatay ruuxii uu ugu tala galay”

Xawaalad Lacageed waa nidaam aan rasmi ahayn, Waxayna ku fidsanyihiin meelo kala duwan oo ay ka mid tahay Bariga Dhexe, Afrika iwm, nidaamkan malaha nuqullo ama dokumeentiyo xirfadeeysan oo aad loo habeeyay, sidaas daraadeed ma`aha mid la la yaabo haddii la helo dad nidaamkan u adeegsado si sharci darro ah ama suuq madoow ah, sidoo kale hayadaha baaritaanka lacagaha ma laha fikrado iyo qorshe habeeysan oo ku salaysan sharci fulineed ku saabsan macaamilka iyo maamulka xawaaladaha. Nidaamkan xawaaladaha waxaa la adeegsan jiray ilaa iyo muddo hore , xagga taariikhda waay ka da weynyihiin nidaamka bangiyada rasmiga ah ee hadda dunida ka jira.

Xawaaladaha ku yaal dalka Holland (iyo inta kale ee Yurub) si eey u bixiyaan lacag sharciga waafaqsan waa in ay leeyihiin ruqsad (Laysan) ama ay wakiil ka yihiin shirkad sharciyeesan, tani waxay sidoo kale noqon kartaa ruqsadda aad u adeegsan karto dal kale oo Yurub ah.

Holland, dhowr shirkadood oo xawaalad lacageed sharciyeeyaan ayaa ka howlgala, waliba si firfircoon, waxaase kaloo jiri kara qaar kale oo si sharcidarra ah wax u xawila, waxaase arintan aad ugu kurgala bangiyada waddanka iyo hayadaha amaanka lacagaha. Kuwa sharciyeesan waxay howlo lama huraan ah u hayaan bulshada u adeegsata eheladooda.

Faraqa ugu weyn ee u dhexeeya shirkadaha xawaaladaha sharciga ah iyo kuwa aan sharciga-ahayn maaha qiimaha macaamilka lacagta looga qaado oo ka kooban isku-dhafka sarrifka iyo komishanka, laakiinse waa macluumaadka la xiriira xagga sharciga, taas oo maamulka xawaaladaha lagu amray in ay muujiyaan caddayn ama aqoonsi ansax ah sida paasapoor ama dokumeenti kale si loo habsado macaamilka xogtiisa, haseyeeshee tani waxay ku adagtahay dad badan oo cabsi ka qaba in ay dabagal ku sameeyaan hayadaha amaanka iyo kuwa canshuuraha ee waddanka.

Si kastaba ha ahaatee, tani waa ismaandhaaf weyn. Macluumaadka mawaadinka waxaa ilaalinaya Sharciga Ilaalinta Macluumaadka qaranka oo ah in aan la siin karin xogta shakhsiga qof kasta. Intaa waxaa dheer in shirkadaha sharciga ah ay leeyihiin faa'iido ah in aad muujin karto in aad lacag u dirto eheladaada marka aad codsanayso in lagu keeno ruux ka tisan eheladaada. Shirkadaha sharciga ah ayaa sidoo kale gacan ka geysta bulshada, tusaale ahaan iyagoo siinaya dhallinyarada shaqo iyo fursadda ay ka helaan khibrad.

Haddii aad u fiirsato mustaqbalka , waxaa jira arrin kale oo muhiim u ah bulshada Soomaaliyeed, sida khatarta argagixisanimada adduunka iyo Soomaaliya gaar ahaan khatarta al-Shabaab iyo burcad-badeednimada - waxay sii kordhineysaa in laga shakiyo dad gaar ah in ay lacag u diraan meel khalad ah, tani waa mushkilad dhab ah oo muujinaysa xidhitaankii dhawaa ee xisaabaadka bangiga adduunka oo ay ka mid ahaayeen shirkadaha xawilaadda lacagaha ee Barclays Bank ee England, oo saameyn weyn ku leh shirkadahaas iyo beesha Soomaaliyeed. Dhab ahaantii, lacagaha la xawilo ayaa lagama maarmaan u ah dad badan oo ku nool Soomaaliya, haddii xawaaladaha la joojiyo waxay ka dhigantahay khasaaro xoog leh iyo burbur bani'aadamnimo oo ku habsaday danyartii Soomaaliyeed ee ku nooleed xawaaladda iyo horumarka dhaqaalaha ee waddanka Somalia.

Haddaba Si ay suurtoagal u noqoto in nidaamka xawaaladda ay sii jiraan mustaqbalka, waxaa lama huraan ah in madaxda shirkadaha Xawaaladha u hoggaansamaan shuruucda caalamka, islamarkaana la jaanqaadaan isbedelka dhaqan dhaqaale iyo siyaasadda adduunka ka socda. sidoo kale waa in ay maalgalin ku sameeyaan aqoon isweeydaarsi iyo cilmibaaris joogta ah, kana sameeyaan meelaha munaasabka u ah, taasi waxay kordhinaysaa kalsoonida bulshada Soomaaliyeed iyo tan aduunkaba ka qabo Xawaalad Lacageedka.